# Statens barnehus

## Yaannu nahay?

# Statens barnehus



Qof kastaa xaq ayuu u leeyahay innuu ammaan helo islamarkaana wuxuu xaq u leeyahay in la caawiyo haddii dhibaato haysato.

Haddii la qabo shaki ku saabsan in carruur ama qof weyn oo si gaar ah u nugul loo geystay ama uu markhaati ka ahaa xadgudubyo jinsiyeed, tacadi ama faldembiyeedyo kale, waxa muhiim ah in boolisku ogaado iyo in dacwad loo gudbiyo booliska. Dadka waaweyn ee si gaar ah u nugul waxa laga wadaa dadka qaba dib u dhac garaad ama awoodoodu si kale u hoosayso oo markaa u baahan in loo fududeeyo waraysiga booliska.

Waraysiga boolis ee la fududeeyay waxa lagu qaba-nayaa goobo ammaan ah oo ku yaalla Staten barnehus (Xarun-qarmeedka ilmaha dhiban). Halkaas waxaa lagula kulmayaa boolis dharcad ah iyo koox aqoonyanno ah oo ku takhasusay kiisaska noocan ah.

## Waa maxay waraysi boolis oo la fududeeyay?

Waraysi boolis oo la fududeeyay waa kulan lagu xaqiijinayo cadaymo oo carruur ama markhaatiyo kale oo sharcigu sheegay lagu waraysanayo goob leh jawi ku habboon, taas oo lagaga maarmayo inay yimaadaan maxkamad oo ay warbixin siiyaan. Waraysiyada waxa laga duubayaa fiidyow. Xeerarka ku saabsan waraysiyada booliska ee la fududeeyay iyo dadka ka qaybgalaya waraysiga booliska waxa maamulaya Xeerka Habraaca Kiisaska Ciqaabta § 239.

## Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus] halkee waddanka kaga yaalaan?

Xarumaha-qarmeedka ilmaha dhiban [Statens barnehus] waxay ku yaallan 11 ka mid ah magaalooyinka Norway. Kuwaasoo ah Bergen, Bodø, Hamar, Kristiansand, Moss, Oslo, Sandefjord, Stavanger, Trondheim, Tromsø iyo Ålesund. Qaar ka mid ah xarumaha carruurta ayaa laamo ku leh magaaloyin kale.

## Waa maxay ujeedada laga leeyahay xarumaha carruurta?

- **Jawi la fududeeyay.** Xarumaha carruurtu waxay muhiim u yihiin in carruurta iyo dadka waaweyn ee nuguli ay helaan meel ay kaga sheekeeyaan dhibaatooyin culus ama adag oo ku dhacay.
- **Waxyaalaha loo baahan yahay oo hal meel la isugu keenay.** Dhammaan hay’adaha kala duwan ee kiiska ku shaqo leh ayaa la isu keenayaa si ilmaha iyo qofka weyn ee nuguli uga maarmaan inay hay’ado kala duwan u tagaan oo marba mid u sheegaan wixii ku dhacay.
- **Hawlaha oo la isuduwayo.** Waxannu isuduwaynaa la sii socodka dambe ee Hay’adda daryeelka carruurta, booliska iyo adeegyada caafimaadka.
- **Culays ka yarayn.** Si ilmaha ama qofka weyn ee nuguli uga maarmaan inay maxkamad tagaan oo warbixin siiyaan, waxa waraysiga laga duubayaa fiidyow la daawadan doono haddii maxkamad la qabto.

- **Ilaalinta caddaaladda.** Waxa si weyn diiradda loo saarayaa in ay caddaalad helaan dhammaan dadka kala duwan ee kiiskaan khuseeyo.

## Yaa imanaya xarunta carruurta?

- Carruurta 16 sano ka yar ama dadka 18 sano ka weyn ee si gaar ah u nugul ee laga shakisan yahay in loo geystay ama ay markhaati ka ahaayeen xadgudubyo jinsiyeed, tacadi ama faldembiyeedyo kale.
- Boolisku waxay sidoo kale ay waraysi boolis oo la fududeeyay la yeelan karaan carruurta jirta 16 ilaa 18 sano marka kiisku ku saabsan yahay fal-jinsiyeed lagu sameeyay carruur la dhalay ama awoow/ayeeyo loo yahay, fal-jinsiyeed dhexmaray walaalo ama fal-jinsiyeed ilmaha uu la sameeyay qof qaraabo ah.
- Sidoo kale waxa da' yarta laga shakisan yahay inay sameeyeen fal-dembiyeedyo waaweyn la go'aamin karaa in ciidanka booliska u waraysi la yeesho, kaasoo ka dhici doono Xarumaha carruurta.
- Markaa intaa laga tago, booliska ayaa go'aamin kara haddii dad kale waraysi loola yeelan doono.

## Maxaa ka dhaca xarunta caruurta?

- Waraysi boolis oo la fududeeyay
- Waraysi boolis
- Baadhitaanno caafimaad iyo baadhitaanno ku saabsan ilkaha
- Daaweyn iyo la sii socosho
- La xidhiidhka iyo isuduwida halwaha hay'adaha kale sida Hay'adda daryeelka carruurta
- Talo-siinta iyo hagitaanka hay'adaha dawladda iyo dhinacyada gaarka ah

POLITIET

STATENS BARNEHUS
Et tverrfaglig kompetansehus